

## **Macluumaadka bukaanka ee loogu taloglay gudbinta degdega ah Warqad yarahaan waxay sharxeysaa sababta uu dhakhtarkaada guud isbitaal kuugu diray, macnaheedu waxa uu yahay iyo waxa lagaaga baahanyahay.**

### **Maxay tahay sababta isbitaal la iigu gudbiyay si deg-deg ah?**

Si deg deg ah ayaa laguugu gudbiyay isbitaal sababtoo ah dhakhtarkaada guud waxuu dareemay in calaamadaha xanuunka ee ku haayo in ay u baahantahay baaritaan dheeraad ah waxuuna kuu diray qof takhasus ama aqoon dheeraad ah leh. Waxaad filan kartaa in dhakhso lagu arko si loo ogaado waxa kugu dhacay ama kaa khaldan.

### **Tani macnaheedu ma in aan Kansar qabaa?**

Waxaa jiro xaalado guud oo badan oo lala xiriiriyo calaamadahan, oo ay kamid tahay suurto galnimada Kansar. Inta badan dadka si deg deg ah loo gudbiyo Kansar ma qabaan.

Haddii ay dhacdo in Kansar lagaa helo, markaas hubinta in la ogaado xanuunka aad qabto xilli hore ayaa macnaheedu yahay in ay u dhowdahay in daaweeyntu ay waxtar badan yeelato, sidaas darteed ayeeyna muhiim u tahay in dhakhso lagu arko.

Maadaama si deg deg ah laguugu gudbiyay, taasi macnaheedu waa si dhakhso ah ayaa ballan isbitaalka lagaaga sameynayaa muddo laba todobaad ah gudahood, laakiinsuurto gal ah in ay hal todobaad gudahiiis noqoto. Waxaa laga yaabaa in lagaaga baahdo in baaritaan dheeri ah lagugu sameeyo afarta todobaad ee soo socoto si xanuunka si dhakhso ah loogu ogaado.

### **Dhakhtarkaada maxuu u baahanyahay in uu ogaado?**

- Hubi in dhakhtarkaada guud uu haaysto cinwaankaada saxda ah iyo taleefoonkaada oo uu kamid yahay taleefoonkaada gacanta haddii aad mid leedahay maadaama laga yaabo in uu isbitaalka kaalaso xiriiro.
- Haddii aadan ballanta imaan karin labada todobaad ee soo socoto gudahood, fadlan dhakhtarkaada guud u sheeg.
- Haddii aad turjubaan u baahantahay, fadlan u sheeg dhakhtarkaada guud ayaga ayaana tutjubaan kuu diyaarinayo.
- Haddii aadan ballan ka helin isbitaalka muddo laba todobaad ah gudahood, fadlan la xiriir dhakhtarkaada guud.

## **Kadib maxaa xigayo?**

Dhakhtarkaada guud ayaa ballan kuu sameeynayo Haddii dhakhtarkaada uu san kuu sameeyn karin ballanta, isbitaalka yaa kulasoo xiriirayo si uu ballan kuugu sameeyo. waxaa suurtoagal ah in isbitaalka uu kuu soo diro macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ballanta oo ay kamid yihiin haddii ay jiraan baaritaano lagu sameeynayo maalinta aad tageeyso.

Markii aad aqbasho taariikhda ballanta waa muhiim in aad tagto ballanta. Fadlan wac lambarka warqadda ballanta ku qoran si aad isbitaalka dhakhso ugu wargaliso haddii aadan ballanta tagi karin.

## **Maxaa dhacayo markaan isbitaalka tago?**

Markii ballanta isbitaalka lagu sameeyo inta badan waxaad la kulmeysaa qof takhasus leh ama waaxa laguugu sameeyn doonaa baaritaano lagu ogaanayo xanuunka ku haayo. Inta aadan ballanta imaan ayaa lagu sheegayaa haddii baaritaano lagaa qaadayo markaad ballanta xaadirto, sidaas darteed fadlan hubi in aad raacdo waxii tilmaamo ah ee horeey lagu siiyay.

Waad soo wadan kartaa qof saaxiib kaa ah ama qoyskaada ah, maadaama laga yaabo in ay ku caawiso haddii aad wax wal-wal ah ka qabto in aad fahmi waayso waxyaabaha ay kooxda caafimaadka kaala hadli doonaan.

## **Wax su'aalo ah?**

Haddii ay jiraan wax aad ka wal wal santahay ama aad qabto su'aalo ee ku saabsan isbitaalka lagu gudbiyay fadlan wac xarunta dhakhtarkaada guud si aad ula hadasho qofkii isbitaalka kuu wareejiyay

**Meelo aad macluumaad dheeri ah ka heli karto.**

<https://www.cancerresearchuk.org/>

<https://www.macmillan.org.uk/information-and-support>